



Baaritaan jireed oo ciyaaraha la xiriira oo lacag la'aan ah oo laga helayo dhowr goobood

Bilowga ciyaaraha dayrta waxaa inaga xigta hal toddobaad, iyada oo kooxaha dugsiyada sare loo fasaxay in ay sameeyaan tababar qaadashada rasmiga ah Isniinta, Ogoosto 13. Taasi macnaheedu waa in saacadu socoto oo ay tahay in ciyaartoyda ay dhammeystaan baaritaanka jireed ee looga baahan yahay si ay uga qayb qaataan.

Waxaa jira fursaddo dhowr ah oo la heli doono toddobaadkan:

Xarumaha Caafimaadka Ardayga ee Degaanka Multnomah ayaa marti gelin doona Maalmaha Baaritaanka Caafimaadka Jireed ee Cayaaraha la xiriira laga bilaabo Talaadada ilaa Jimcaha taasi oo ka dhacaysa shan goobood. Xarumuhu waxay ku yaalaan dhismayaasha dugsiya sare waxaana heli kara arday kasta oo ku nool Degaanka Multnomah, iyada oo aanay jirin kharashyo jeebka laga bixinayo. Xarumaha caafimaadku waxay u furan yihiin baaritaanka jireed ee ciyaaraha la xiriira laga bilaabo 7:30 subaxnimo ilaa 4 galabnimo, ee maalmahani:

- Dugsiyada sare ee Franklin, Jefferson, Roosevelt, Talaadada- Arbacada
- Dugsiya Sare ee Cleveland, Arbacada- Khamiista
- Dugsiya Sare ee Parkrose (oo ah ka ugu dhow ardayda Madison), Jimcaha\]

Waxaa lagaa codsanayaa in aad wacdo xarunta caafimaadka ee kuugu dhow si aad ballan u samaysato. Liiska waxaa laga helayaa [website-ka xarunta](#).

Sidoo kale, Providence Health Care wuxuu bixin doonaa baaritaan jireed oo ciyaaraha la xiriira oo ka jira Dugsiya Sare ee Jefferson, laga bilaabo 5-8 galabnimo. Arbacada.

Tartanka loogu talagalay ciyaaraha dayrta – kubadda cagta maraykanka, kubadda cagta ee caadiga ah, kubadda laliska iyo orodka dheer – waxay bilaabmayaan Khamiiska, Ogoosto 23, oo ah marka kooxaha kubadda cagta maraykanku ay ku tartami doonaan xaflad weyn oo ciyaareed, iyada oo ciyaaraha kale ay qaban karaan ciyaaro iyo kulamo. Kooxaha kubadda cagta maraykanku waxay tartan ciyaareed oo buuxa geli karaan laga bilaabo, Khamiista, Ogoosto 30.

Jadwalada waxaa laga heli karaa [OSAA.org](https://www.osaa.org). Wixii macluumaad ee dheeraad ah waxaa laga heli karaa [Website-ta Naadiga Dugsiyada Ka Dhexeeya ee Portland](#).